**TENNESSEE IMMIGRANT AND REFUGEE RIGHTS COALITION**
442 Metroplex Dr., Building D, Suite 118 Nashville, TN 37211
Tel: 615.833.0384 Fax: 615.833.0387
Web: www.tnimmigrant.org

# HAWSHA LA QABANAYO

**TIRRC waa wada-shaqayn gobalka oo dhan ku taala oo ay hogaaminayaan qaxooti iyo dadka soo haajiray oo hawl-qabashadoodu tahay in ay awood siiyaan dadka soo haajiray iyo qaxootiga ee Tennessee oo dhan si ay u sameeyaan cod isku duuban, difaacaana xuquuqdooda isla markaana abuuraan jawi wanaagsan oo loo eegi karo in ay xaqiiqdii wax ku soo kordhin karaan gobalka.**

# MABDA'YADA

Is-bahaysigu:

*Waxa ugu horayn hogaamindoona dad soo haajiray iyo qoxooti*

*Dhiirri-geliyo ka qaybqaadashada dhammaan dadka soo haajiray iyo qaxootiga iyo kuwa taageeraba*

*Dhinac la iska dhigo waxyaabihi loo qabanlahaa shakhsi ama uurur si loo hor mariyo xuquuqda iyo daryeelka jaaliyadaha dadka soo haajiray iyo qaxootiga.*

*Si cad u taageera isla markaana difaaca xuquuqda dhammaan dadka soo haajira iyo qaxootiga iyadoon la tixgelinayan xaalka dadka soo haajiray, oo aanan xuquuqda kuwa tirada yar lagu samayn xal dhex-dhexaadi marka loo eego xuquuqda kuwa tirada badan*

# MURAADYADA

*Si cad loo taageero xuquuqda dhammaan dadka soo haajiray iyo qaxootiga iyo qoysaskooda*

*In la abuuro sal taageera dadka soo haajiray iyo qaxootiga iyada oo la taageerayo abuuridda ururrada dadweynaha soo haajiray iyo qaxootiga*

*In kor lo qaado hoggaamidda ku dhex jirta dhammaan jaaliyadaha soo haajiray iyo qaxootiga*

*La kordhiyo dareenka dadweynaha ee ku saabsan wax-tarka dadka soo haajiray iyo qaxootiga iyo isla markaana xaqiiqaha dal-socodka*

*La dhiiri-geliyo midnimada, wada-shaqaynta iyo isla-socodka u dhexeeya kooxaha kale duwan ee dadka soo haajiray iyo qaxootiga iyo kooxaha kale oo la liido ee ka mid ah jaaliyadda guud ahaaneed*

# Maxay tahay TIRRC?

TIRRC waa is-bahaysi kala duwan oo mudan in la xuso oo ka kooban dad soo haajiray, qaxooti, iyo kuwa badan oo taageera oo Mareykan ku dhashay ugana wada shaqeeya sidii horey loogu marin lahaa nolosha iyo aragtida dadweynaha Tennessee ee la xiriira dadka qurbaha-ku dhashay ee tradoodu aad u koreyso. Is-bahaysigan waa urur ku salaysan xubin ahaansho, oo leh xubno shakhsi ah iyo mid urur. Xubnaha ururka TIRRC waxay ka matalayaan shakhsiyado ka yimi Koonfurta iyo Ameerikada dhexe, Afrika, Aasiya, Bariga Dhexe iyo Yurubta Bari.

# Sidee bay u abuurantay TIRRC?

TIRRC waxa la asaasay 2001 ka dib markii olole lagu guuleystay gobalka oo dhan oo loogu talagalay in la taageero sharci kordhinaya in dadka soo haajira ay helaan shatiga babuurka lagu wado. Kadib ololihii 2001, hogaamiyaashi dadka soo haajira waxay go'aansadeen in ay ka fa'iidaystaan dhaqdhaqaaqi awooddoodii cajiibka lahayd, oo wada-shaqayntoodana ka dhigaan jiritaan rasmi ah. Ilaa iyo waqtigaas TIRRC wuxu noqday mid ka mid ah is-bahaysiyaasha dadka soo haajira iyo qaxootiga ee kala duwan ee waddanka gudihiisa, oo isla markaana yahay mid ka mid ah kuwa aad ugu waxtarka badan.

# Waa maxay waxa ay qabato TIRRC?

TIRRC was urur aan u shaqayn in faa'iido uu helo, hashse yeeshe ma ahaa mid si toos ah adeeg u bixiya. In kasta oo ay jiraan ururro tiradoodu kordhayso oo aan u shaqayn faa'iido-helin oo adeegyo mumihim ah siiya dadka soo haajira iyo qoxootiga – sida casharro Af Ingriisi iyo kalkaalo turjumaad - TIRRC waa ururka keliya ee gobalka Tennessee oo dhan u shaqeeyana abuuridda cod si dhab ah u matalaya maslaxadda "dadka cusub ee reer Tennessee" ee fagaaraha dadweynaha. Si tan loogu guuleysto, TIRRC waxay awooddeeda saareysa afar meelood oo muhiim ah:

**Aasaas Dhis** – Xoog-saar xoojinta iyo mideynta aasaaska dadka soo haajiray iyo qaxootiga iyada oo la siinayo tababarro, gargaar farsamo iyo fagaarayaasha loogu tala galay wada-shaqaynta kuwa soo koraya iyo kuwa horey u jiray ee ururrada qaxootiga iyo dadweynaha.

**Beddelidda Siyaasasdda ee Dadweynaha Caadiga ah**– Xoog-saar awood-siinta madaxda dadweynaha caadiga ah ee dadka soo haajiray iyo qaxootiga si wax-tar leh u taageeraan beddelidda siyaasadda ee heerarka degmada, gobalka, iyo dowladda dhexe.

**Difaaca Xuquuqda Dadweynaha/Xorriyadaha Dadweynaha** – Ilaalinta xorriyadaha dadka soo haajiray iyo qaxootiga ee Tennessee iyada oo qofkasta la baro xuquuqdiisa isla markaana la abaabulo jaaliyadaha si ay wax uga qabtaan eedeeynta ku xad gudbkaa xorriyadda dadweynaha/ xuquuqda dadweynaha.

**Ogaanshaha Dadweynaha** – Ka shaqaynta kordhinta ogaanshaha dadweynaha ee ku saabsan wax-tarka dadka soo haajiray iyo qaxootiga isla markaana xaqiiqda habka jaban ee laanta socdaalka. Isla markaasna xoog-saara dhiiri-gelinta la yeelashada xiriiro wanaagsan oo u dhexeeya jaaliyadaha guud ee Tennessee.

# ARRIMAHA AHMIYAD LA SIIYO

*Arrimaha TIRRC ahmiyad-siinayso waxa caddaynaya xubnaheeda Noofembar kasta marka la qabto Shirweynaha Xubnaheeda ee Sannadkii.*

## LAANTA SOCDAALKA

Taageeridda dib u habeeyn balladhan laanta socdaalka ee midaaynaysa qoysyada, dhimaysa shaqada isku-ururay ee laanta socdaalka, siinaysa dal ku-gal dadka soo haajiray oo si sharci leh uga shaqaynaya Mareykanka, kana saaraysa hooska ay ku jiraan dadka soo haajiray ee sharci la', isla markaana abuuraya "waddu loo maro muwaadinnimo" ee loogu tala galay dhammaan dadka soo haajiray.

## AWOOD U YEELASHO ISTICMAALIDDA WAXBRASHADA & LUQADDA

Kordhinta ilaha-dhaqaale iyo fursadaha dadka soo haajira inay bartaan Af Ingriisiga, iyo abaabulidda siyaasado hubinaya in dadka soo haajira ee ku jira habka barashada Afka Ingiriisida aan laga horjoogsan helidda adeegyada aasaska ah (adeegyada caafimaad, adeegyada sharciga, shatiyada baaburta lagu wado, iwm).

## XUQUUQDA DADWEYNAHA & TAKOORIDDA

Hubinta in dadka soo haajira ogaadaan xuquuqdooda, oo ay abaabulaan jaaliyadaha dadka soo haajira kana jawaabaan xad gudubka xuquuqdaas iyo mararka kale ee takoorid la sameeyo.

## XANNAANO-CAAFIMAAD

Aqoonsiga iyo faafinta macluumaadka ku saabsan adeegyada caafimaad ee la heli karo, iyo taageeridda fulinta xuquuqaha xannaanada-caafimaad.

## GAADIID

Awood u fududaynta dadka soo haajira iyo qoxootiga Tennessee helidda dukumeentooyinka baaburta lagu wado lagana shaqaynayo sidii loo baabi'in lahaa sharciyada iyo xeerarka hortaagan awoodan.

# WAA MAXAY SABABTA AAD XUBIN UGA NOQONAYSO?

Maanta maalin ay weligeed TIRRC ay uga baahantahay taageeridada ma jirto si loo dhiso dhaq-dhaqaaq xoog leh ee khuseeya xuquuqaha dadka soo haajira ee Tennessee. Kor buu kacay dareenka mawjadeed ee gobalkeena ee ka soo horjeeda dadka soo haajiray, oo isla markaana tirada qorshaha sharci ee lasoo jeediyey oo khatar xoog leh gelinaya xuquuqda iyo nolol-wanaagga tobanyaal kun ee qoysyada dadka soo haajira iyo kuwa soo qaxayba. Isla markaana, qaar badan oo dadka soo haajiray iyo qaxootiga ee Tennessee weli way la'yihiin wixii aasaas ah ee ka caawimi lahaa sidii ay ugu najixi lahayeen bulshadan cusub, sida tayo/awood waxbrasho, shatiga baaburka lagu wado, xuquuqda dadweynaha/xorriyadaha dadweynaha, xuquuqda meelaha laga shaqeeyo, karti dhaqaneed/awood xannaano-caafimaad, tayo/awood guryi iyo tayo/awood waakiil sharci. Fadlan taageer dadaalka TIRRC ee lagu difaacayo oo horeyna loogu dhigayo xuquuqda dadka soo haajira iyo qaxootiga ee Tennessee adiga oo noqonaya xubin ka mid ah.

Xubinimadu waxay leedahay manfacyadan soo socda:

*Lacag la'aan ku gelidda Shir-Weynaha Sannadkii ee Xubinimo laguna siinayo door bidid awood isticmaalidda dhammaan xafladaha iyo fadhiyada khiddadaha sare.*

*Door bidid lagu siinayo isticmaalidda tababarrada xubin ee sida meelaha ay ka mid tahay qadiyad taageerka, abaabulidda bulshada, lacag-uruurin, xidhiidhinta warbaahinta, iyo hoggan dhisidda*

*Casriyaynta e-mailka TIRRC, digtoon wax qabadyo iyo warsidayaal.*

*Doorasho mudnaan-gaar leh ee arrimaha ahmiyad la siiyey iyo xubnaha guddi*

*La xiriirka jaaliyadda guud ee dadka soo haajiray iyo qoxootiga ee gobalka ku fidsan*

Waxa aan aasaasnay xeer-degan oo hubinaya in TIRRC ahaato urur ay waddo arrimaha dadka soo haajiray iyo qaxootiga:

*Ururada ayna hoogaamin arrimaha dadka soo haajiray ama qaxooti laakin doonaya in ay taageeran hawshayada kana qaybgalaan Shir-weynahayaga Sannadkii ee Xubinimo waxa ay noogu soo biiri karaan sidii xubno TIRRC gacan-saar la leh.*

*Ururada gacan-saar nala leh waxay ka cod-bixin karaan arrimaha mudnaan leh iyo xubnaha guddi ee Shir-Weynaha Sannadkii, hase yeeshe qof-kasta oo soo haajiray ama qaxooti ah iyo ururrada ay hogaaminayaan dadka soo haajiray iyo qaxootiga ayaa leh quwada weyn ee cod bixinta.*

*Xubinimado waxa loo cusbooneysiin kara hab sannadeed.*